XARUNTA HUMARINTA LUQADDAEE NAWAAXIGA WAQOOYI BARI (NEMLDC)

# DHIBAATADA DHANKA HORUMARKA LUQADDA

## WAALIDKA: WAA MAXAY DLD?

**Cilladaha Horumarinta Luqadda (DLD) waxay sharraxaysaa carruurta ay haysato dhibaatooyinka saameeya sida ay wax u fahmaan una isticmaalaan luqadda**

Dhibaatooyinka xagga luqadda ah:

- waxay biloowdaan carruurnimada waxayna sii socon karaan ilaa qaangaarnimada
- waxay si weyn u saameyneysaa wada hadalka iskuulka, guriga iyo nolol maalmeedka
- laguma faah faahin cudur kale sida Autism, cillad maskaxeed ama dhaawac maskaxda ah
- waxay la imaan kartaa cudurada kale sida ADHD iyo dhibaatooyinka aqriska iyo fahamka.
- waxaa kaa caawin kara waxqabadyo takhasus leh, in kastoo ay qaadan karto waqti dheer.

## DLD YUU SAAMEEYAA?

- DLD waa wax carruur badan ku dhaca. Waxaa la qiyaasayaa in DLD uu ku dhaco 1 ka mid ah 14kii carruur ah - **taasi waa 2 carruur ah fasal kasta.**
- DLD wuxuu la imaan karaa ADHD iyo dhibaatooyinka aqriska iyo fahamka.

## MAXAA SABABA DLD?

- Ma jirto sabab la og yahay oo keenta DLD. Mararka qaarkood DLD waxay ku imaadaa dhaxal qoysaska.
- Barashada in ka badan hal luqad ma keento DLD, si kastaba ha noqotee dhibaatooyinka ayaa ka jiri kara dhammaan luqadaha uu ilmuhu la kulmayo. Carruurta qaba DLD waxay baran karaan in ka badan hal luqadood, laakiin waxay ku qaadan kartaa waqti dheer.

## DLD SIDEE U EGTAHAY?

Carruurta qaba DLD waxaa laga yaabaa inay dhibaatooyin kala kulmaan::

- **Nuxurka luqadda**: sida fikradaha, dhacdooyinka, ficillada iyo cilaaqaadka laiskugu sheego.
- **Foomka luqadda**: sida dhawaaqyada, ereyada iyo jumladuhu u abaabulan yihiin si ay macno u yeeshaan.
- **Adeegsiga luqadda**: xeerarka bulshada ee wada hadalka, sida hadal kala qaadashada iyo isticmaalka indhaha.

## WAA MAXAY LDCs?

Carruurta qabta DLD waxay ka faa'iideystaan macallimiinta, iyo kalkaaliyayaasha waxbarashada ee tababaran oo ay taageerayaan dhakhaatiirta hadalka. Xarumaha Horumarinta Luqadaha (LDCs) waa iskuulo dawladeed oo madaxbanaan oo loogu talagalay carruurta leh DLD ee soo buuxiya shuruudaha u-qalmitaanka. Carruurta waa in dhakhtarka cudurada hadalka iyo dhakhtarka cilmu nafsiga ee iskuulka ama dhakhtarka caruurta ay usoo gudbiyaan LDC. Gudbintu waxay ku egtahay bisha Sebtember sanad kasta, si loo meeleeyo sanadka soo socda.

Ardayda loo arko inay u qalanto waxay aadaan LDC halkii ay ka aadi lahaayeen iskuulkooda guud, waxayna helaan barnaamij luqad oo gaar ah oo ay u dheertahay manhajka WA. NEMLDC waxay wax u qabtaan carruurta ku jirta Xannaanada illaa Sannadka 2aad, **ugu badnaan saddex sano.** Carruurtu markaas kabacdi waxay u gudbaan iskuulka xaafadooda.

## MACLUUMAAD DHEERAAD AH?

- Si aad wax badan uga ogaato sida loola xirriiri karo DLD **NEMLDC & Adeeg Fidinta** kala xirriir 9218 1600 ama booqo boggeena internet ka http://northeastldc.wa.edu.au/.
- **Adeegga Horumarinta Carruurta (CDS)** waxay bixiyaan adeegyo lacag la'aan oo loogu talagalay carruurta ku nool nawaaxiga magaalo weynta Perth. Macluumaadka ku saabsan gudbinta waxaa laga heli karaa halkan https://cahs.health.wa.gov.au/our-services/community-health/child-development-service
- **Khabiirka cudurada hadalka** waxaa laga heli karaa websaydhka 'Speech Pathology Australia ee www.speechpathologyaustralia.org.au ama Ururka Khudbadaha Hadalka ee Khaaska ah ee Galbeedka Australia weebsaydhkooda www.pspawa.com.au.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan DLD ayaa laga heli karaa halkan: https://radld.org/